

## **Amarka L. 17**

### **Nidaaminta sarifka lacagta shilinka Soomaaliga oo lagu beddelayo liraha Talyaaniga iyo shilinka E.A.**

#### **MAAMULKA WASAAYADDA SOOMAALIYA EE TALYAANIGA**

Marka uu arkay xeerka 8 Febberaayo 1950, lamba. 12;

Marka uu arkay dekereetada Madaxweynaha Jamhuuriyadda Talyaaniga ee taariikha 31 Maarso;

Marka uu arkay amarkiisa isla maalintaas lamba. 14 ee ku saabsan in loo sameeyo dhulka Somaaliya lacag ku magaacaaban “Soomaali”;

Marka uu arakay amarkiisa isla maantaa lamba. 15 ee ku saabsan goynta qaabka farsamo iyo farshaxan lacagaha qaddaadiicda iyo waraaqah soomaalida

Markuu tixgaliyay baahida loo qabo in la nidaamiyo shilinka E. A. iyo liiraha talyaaniga lagu sarifo shilin soomaaliga;

Isagoo Qaddarinay awoodda la siiyay;

#### **WUXUU AMAR KU SOO SAARAYAA**

##### **Qod. 1**

Hawlgallada sarifka shilinka E. A. iyo liiraha talyaaniga ee loo baddalo soomali waxay bilaabanayaan 22 maajo 1950 waxayna dhammaanayaan 22 Julaay 1950 waxaana Bangiga Talyaaniga ( Banca di Italiya) ku qabanaya Xaafiisyada sarifka aan guur-guurin iyo kuwa guur-guura ee ku yaalla Degmooyinka.

##### **Qod. 2**

Sarifka waxaa lagu qabanayaa Muqdisho xarumaha Banca di Itaalia, Banca di Napoli iyo Banca di Roma dhammaan xilliga lagu soo sheegay qodobka sare. Goobaha kale Guddoomiyaasha Degmooyinka waxay isla gaarayaan dadka degaanada iyo sarakiisha Banca do Itaalia, maalmaha sarifka uu ka dhacayo Deegaanada kala duwaan ee ay ka tirsanyihiin, iyadoo si ballaran loo baahinayo kolba sida uu yahay dhaqanka maxalliga.

##### **Qod. 3**

Dhammaan dadka iyo shaqsiyadaha qaanuuneed ee dalka Soomaaliya deggan amase hawlo ku haysta, waa in ay shilin soomaali u baddashaan shilinka E. A. iyo liiraha talyaaniga oo ku haystaan isla dalka.

Looma oggolaanayo sarifka lacagaha waraaqaha muddadoodi la dhaafay iyo kuwa sababa kale awgood loo aqoonsaday kuwo aan sax ahayn.

Haddiiba uu yimaado shaki ku saabsan sharci ahaanshaha haysashada iyo meesha laga keenay ama shakigu uu yahay dhowrid la'aanta xeerarka lacagaha waraaqaha iyo qaddadiicda ee Soomaaliya ka jira, sarifka waa la joojinayaa lacagahana waa la keydinayaa iyado qofka wata Bangiga Talyaaniga laga siinayo rasiid aan canshur lahayn, lana sugayo inta Guddiga ku xusan qodobka 4 ee soo socda uu go'aan ka gaarayo.

##### **Qod. 4**

Waxaa la dhisay Guddi ka kooban laba wakiila oo ka socda Maamulka Wasaayadda Soomaaliya iyo wakiil ka socda Rugta Ganacsiga.

Guddigu, haddii uu aqoonsado sharci ahaanta haysashada lacagaha lagu soo sheegay faqradda 3 ee qodobka 3, wuxuu oggolaanayaa sarifka. Haddiise ay soo baxdo in la jabiyay xeeraka dalka ka jira, Guddiga wuxuu ayidayaa joojinta sarifka iyagoo waraaqaha u gudbinaya masuulinta shaqada ku leh, islamarkaana wargalinaya Bangiga Talyaaniga.

#### **Qod. 5**

Marka la fulinayo qod. 10 ee amarka lamba. 14 ee isla taariikhdaas, sarifka shilinka E. A. iyo liiraha talyaaniga waxaa laga qaadayaa canshuurta soo socota:

- Shilinka E. A. canshuur ah shilin soomaalin halkii shilin ee E. A.;
- wixii ku saabsan liraha talyaaniga canshuur ah hal shilin soomali 87,50 liire.

Canshuurtaan waxay ku jirtaa sheyga, oo ku waregsan tobanley u dhiganta marka doolarka laga dhigayo oo ah (14 senti U.S.A.= hal shilin soomali) oo ah qiimaha rasmiga ee dollarka oo uu gooyay Xaafiiska talyaaniga u qaabilsan sarifka taariikhdu marka ay ahayd 29 Abril 1950 (lire 624,80 halkii dollar).

Qaraaro dambe ayaa wax looga baddali karaa canshuuraha la soo sheegay, haddii ay wax ku yimaadaan canshuurta xiriitka uu leeyahay shilinka E. A. isbaddal ka sarreeya boqlkiiba 2 u dhigmidda dahabka ee isla shilinka, iyo xiriirka canshuurta uu la leeyaha liiraha talyaaniga, isbaddal ka sarreeya boqolkiiba 2 u dhigmidda dollarka Mareykanka. e/o qiimaha rasmiga ee midkaan oo Xaafiiska sarifyada talyaaniga uu gooyay.

#### **Qod. 6**

Marka la gaaro 22 Juulay 1950 waxaa ka reeban dalka Soomaaliya in la soo geliyo shilinka E. A., marka laga reebo xuddudaha ay oggolyihiin xeeraka lacagaha, iyo liiraha talyaaniga kuwaaso ay la socoto fasaxa lagu soo dhoofiyay.

#### **Qod. 7**

Dhammaan waajibaadyada lacageed ee E. A. iyo liiraha talyaaniga waxaa loo baddalayaa shilin soomali marka la gaaro taariikhda 22 Maajo 1950.

#### **Qod. 8**

Marka la gaaro 23 Julay 1950 shilin soomaaligu wuxuu noqonayaa lacagta keliya ee sharci ahaan Dalka. Isla taariikhdaas wadaxaajoodka dalka ee lacagaha qaddaadiicda iyo waraaqaha shilinka Afrikada Bari iyo liiraha talyaaniga, sidoo kale hawlgal kasta ee shilinka Afrikada Bari iyo liraha talyaaniga ku soo baxay, waxaa lagu dhaqayaa nidaamka u dagan hawlgaladaha lacagaha qalaad.

#### **Qod. 9**

Amarkaan wuxuu daqan galayaa maalinta lagu baahiyo Faafinta Rasmiga Muqdisho, 16 Maajo 1950.

Maamulaha

**Fornari**